



Warbixin ka timid Göteborgs Stad oo covid-19 dartiis loo sameeyay.

Warbixin ka timid Göteborgs Stad oo covid-19 dartiis loo sameeyay.

Waad salaaman tahay!

Warbixintaan waxay Göteborgs Stad kaaga warbixinaysaa waxaad samayn kartid xagaaga (kulaylaha) gudihiisa. Waxaad sidoo kale ogaan doontaa meesha aad la xiriiri kartid haddii aad caawinaad u baahan tahay ama aad dareemaysid walwal.

Xagaagu wuu ka duwan yahay sidii hore sannadkaan. Waxaan u baahanahay inaan sii wadno inaan kala fogaano si aan u joojinno cudurka la is qaadsiiinayo. Gudaha iyo bannaanka – dukaamada gudahooda, meelaha baabuurta la dhigto iyo goobaha dabaasha. Waa inaan sidoo kale ku fikarno sidaan u safri karno si aan iskaga ilaalino saxmadda.

In kasta oo ay dhib badan tahay waa inaan adkaysi muujinno si aan isku ilaalinno. Farqi bay soo siyaadinaysaa haddii aan kulligeen mas'uuliyad qaadno.

Göteborg waxaa laga helaa waxyaalo badan oo lasoo baran (ogaan) karo. Soo booqo goobaha kuu dhow, waxaan ku rajo waynahay inaad heli doontid waxaad aad uga heshid. Gudaha, bannaanka ama kombuyuutarka.

Waad ku mahadsan tahay inaad adkaysi muujisay!

Annagoo isku duuban baan joojin karnaa cudurka la is qaadsiiinayo.

Waxaa jirta caawinaad aad heli kartid adiga da'yarta ah

Loogu talagalay adiga da'yarta ah

Markii iskuulku xiran yahay waxaad u hiloobi kartaa saaxibadaa iyo wixii aad mar kasta samayn jirtay. Haddii tusaale ahaan guriga rabshad ka jirto oo aad dareemaysid amni darro, waxaad la xiriiri kartaa qaabilaadda dhalinyarada aad ka tirsan tahay ama saaxiibka heeganka ah ee Laanqeyrta Cas (Röda korset).

Kasii Akhri wixii intaa dheer goteborg.se/covid19ung

Loogu talogalay adiga ka tirsan dadka cudurka halista ugu jira

Haddii aad ka wayn tahay 70 sano ama aad ka tirsan tahay dadka halista ugu jira cudurka waxaa ku caawin kara qof is xilqaame ah oo kusoo adeega.

Wac Ring 073-839 86 88.

Loogu talogalay adiga leh astaamo cudur

Guriga joog xattaa haddii aad dareemaysid xoogaa inaad hargabsan tahay. Wixii warbixin intaa dheer oo ku saabsan covid-19 iyo sida aad u raadsanaysid daryeel caafimaad, kasii akhri wixii intaa dheer 1177.se ama wac 1177.

Dadka oo dhan waxay xaq u leeyihiin inay ku noolaadaan nolol aan xoog la isku khasbayn

Waxaa jira caawinaad la heli karo haddii aad guriga amni darro ku dareemaysid ama aad ka walwalsan tahay qof kaa agdhow.

Kasii akhri wixii intaa dheer goteborg.se/valdochhot

Ma ka walwalsan tahay dhaqaalahaaga?

Waxaad heli kartaa talobixin bilaash ah.

Kasii akhri goteborg.se/privatekonomi ama wac 031-368 08 00.

Ma u baahan tahay inaad qof la hadashid?

Laanqeyrta Cas waxay leedahay khad telefoon dadka lagu taageero oo covid-19 dartiis loo furay.

Kasii akhri wixii intaa dheer rodakorset.se ama wac 0771-900 800.

Soo baro (ogow) wax cusub

Halkaan waxaad ka helaysaa talooyin iyo fikrado cusub oo baraarujin leh.

- Xafiiska dalxiiska ee ku yaal Kungssportsplatsen wuxuu furan yahay xagaaga oo dhan. Wac 031-368 42 00.
- Kasii akhri wixii intaa dheer oo ku saabsan waxyaalaha lagu tamashleeyo iyo hawlaha firfircoonida loogu talogalay da´ kasta:
kalendarium.goteborg.se
goteborg.com/upplevdittgoteborg

App-yaasha Göteborgs Stad

- **Badplatsen** waxaa laga arki karaa goobaha dabaasha iyo hoolalka dabaasha degmadu leedahay.
- **Biblioteket** waxaad ka helaysaa 25 maktabadaha buugaagta ee magaalada ku yaal oo telefoonka gacanta ku jira.
- **Lekplatsen** wuxuu warbixin kaa siinayaa goobo xiise leh.

- **Nextbike** wuxuu kugu caawinayaa inaad kiraysatid baaskiil ay leeyihiin Styr & Ställ.
- **Parkering Göteborg** waxaa laga arki karaa meelaha baabuurta la dhigto iyo inta boos ka bannaan.
- **Trafiken.nu** Göteborg wuxuu kugu caawinayaa inaad qorshaysatid safarkaaga si aad ugu safartid gaari iyo baaskiil oo iskaga ilaalisid saxmad.
- **Västtrafik ToGo** wuxuu kugu caawinayaa inaad qorshaysatid safarkaaga gaadiidka dadwaynaha.

Ku fekar

- Mas'uuliyad qaad adigoo raacaya talooyinka hey'adaha dawladda. Ku fekar inaad talooyinka wax iska beddelaan.
- Lugee ama baaskiil kaxee haddii aadan wax badan lugayn karin. Iska ilaali inaad ku safartid gaadiidka dadwaynaha Göteborg gudaheeda.
- Iska fiiri mar kasta wakhtiyada la furo iyo in hawlaha firfircoonida la baajiyay.
- Sii qaado qashinkaaga. Si fiican ula soco halista dab inuu kaco iyo mamnuucidda dabshididda.

Soo arag Göteborg-daada

Hawlaha firfircoonida loogu talagalay carruurta iyo da'yarta.

Göteborgs Stad iyo ururo badan waxay fidinayaan hawlo firfircooni. Badankoodu waa bilaash: goteborg.se/sommarlov

Ku jimicso bannaanka

Soo lugee, tijaabi jimicsi bannaanka ku yaal, ama koox bilaash ku wada jimicsadaan: goteborg.se/aktiveradig

Maktabadda buugaagta

- Amaaho buugaag, muusiig, filimo, wargaysyo ama ciyaaro. Dhammaantood waa bilaash, waxyaalo badan kombuyuutarkay ku jiraan: goteborg.se/bibliotek

Khariidada farshaxanka Göteborg

Soo baro farshaxan bannaanka ah oo kuu dhow: goteborgkonst.se/konstkartan

Madxafyada magaalada

Soo arag naqshado, farsamada gacanta, farshaxan iyo taariikh. Bilaash baad ku gelayaa adiga 25 sano ka yar : goteborg.se/museer

Usoo bax oo ku raaxayso cagaarka

Booqo xadiiqadaha, beeraha nasashada iyo meelaha dabiiciga ah: goteborg.com/parker-och-tradgardar
goteborg.se/utochnjut

La xiriir

- goteborg.se
- 031-365 00 00
- goteborg@goteborg.se
- facebook.com/goteborgsstad

Wargayska Göteborgs Stads

vartgoteborg.se

Warbixin ku saabsan covid-19

- krisinformation.se
- 1177.se

Warbixin ku qoran luuqado kale

- krisinformation.se/languages
- Khadka telefoonka wixii ku saabsan covid-19 ee Västra Götalandsregionen, wac 08-123 680 00.

Buuggan yar ee warbixinta ah wuxuu ku jiraa isagoo turjuman goteborg.se/covid19 oo lagu turjumay ingiriis, finish, carabi, bershi, soomaali iyo bosni, korowayshi, serbi, engelska, finska, arabiska, persiska, somaliska och bosniska, kroatiska, serbiska.

**Kala fogaada. Farqi baad soo siyaadinaysaa.
Annagoo isku duuban baan cudurka la is
qaadsiinayo joojin karnaa.**